[Sample School/Home Newsletter Insert]

Shaacinta CAHSEE

Maxaa Laga Qabtay Caawimaada Ardada u Baahan Kaalmayn Marka ay Qaadanayaan CAHSEE?

Dhammaan ardayda dugsiyada gobolka California waxaa looga baahan yahay sida sharciga gobolku dhigayo inay oofiyaan shuruudaha Imtixaanka Ka Bixida Dugsiga Sare ee California (CAHSEE), iyo dhammaan shuruudaha qalinjebinta kale ee degmada ama gobolkaba, si shahaadada dugsiga sare loo guddoonsiiyo. Waxaa shuruudaha CAHSEE-ga la oofin karaa marka lagu najaxo imtixaan ama ardayga naafada ah gudaha laga siiyo ka dhaafida imtixaanka si uu u sii wato waxbarashadiisa taas oo loo eegayo *Xeerka Waxbarashada* Qaybta 60851(c), ama la yimaado sharciga ka reebida ee *Xeerka Waxbarashada* Qaybta 60852.4.

Shuruucda Xeerka 5 ee CAHSEE ayaa sharaxaya kooxahan ardayda ah oo qaadan doona imtixaannada kala duwan ee CAHSEE-ga : Ardaydoo dhan, ardayda u qalma, ardayda baranaya AF-ingiriisiga, iyo ardayda naafada ah. Xeerka CAHSEE wuxuu ku qoran yahay Shebekada intarnetka ee Waaxda Waxbarashada ee California (CDE) oo ciwaankeedu yahay http://www.cde.ca.gov/ta/tg/hs/admin.asp.

Qaababka Imtixaanka ee Kala Duwan ee Ardayda oo Dhan

In la siiyo waqti dheeraad ah maalinta imtixaanka, in la calaamadiyo xaashiyaha imtixaanka, iyo fududayn ama kala caddaynta meelaha imtixaanka kala duwan ee CAHSEE-gu yahay taas oo laga yaabo in la siiyo ardayda oo dhan.

Qaababka Imtixaanka ee Kala Duwan ee Ardayda u Qalma

Tusaaleyaal ku saabsan imtixaanaadka ee qaababka kala duwan ayey u bannaan tahay ardayda qudha oo sida joogtada ah u isticmaasha fasalka waxyaabaha ay ka mid yihiih kuraas iyo miisas gaar ah ama lqa bedbeddeli karo, nalal gaar ah ama qalab wax lagu maqalo oo gaar ah, ama shakhsi kasta qol gooniya imtixaan lagaga qaado.

Qaababka Imtixaanka ee Kala Duwan ee Kuwa Af Ingiriisida Baranaya

Kuwa baranaya luuqada Ingiriisida waa in loo ogolaado inay qaataan qaar ka mid

ah imtixaanaadka kala duwan ee CAHSEE-ga haddii caadi loogu isticmaalo fasalka. Tusaale ahaan, haddii fasalka caadi loogu isticmaalo, waa in loo ogolaado kuwa baranaya luuqada Ingiriisida inay ku maqlaan sharaxaada imtixaan afkooda hooyo ama erey bixin ku turjuman luqadooda.

Ardayda baranaya luuqada Ingiriisida ee fasalka tobnaad waxaa looga baahan yahay inay la qaataan imtixaanka CAHSEE dhammaan ardayda kale ee ah fasalka tobnaad. Inta lagu dhex jiro 24 bilood ee dugsiyada California ee ugu horeysa, waxay ardayda luuqada Ingirisiida baranayaa helidoonaan lix bilood oo waxbarasho akhris, qoritaan iyo laylis Ingiriisi ah (*Xeerka Waxbarashada* Qaybta 60852). Inta waqtigaa lagu jiro, waxaa weli looga sii baahan yahay inay qaataan CAHSEE-ga.

Qaabilaadda Ardayda Naafada ah

Habka qaabilaadda meesha imtixaanka lagu qaadayo iyo geedi-socda hawsha waxbaa laga beddeli karaa taas oo aan saameyn ku yeellan doonin qiyaasida iyo isu eegida buundooyinka imtixaanka ee CAHSEE. Tusaale ahaan, waafajinta CAHSEE-ga waxaa ka mid ah isticmaalka qoraalka Braille, lehna qaybta akhriska xisaabaadka oo ardayda la siinayo ama hadal cajalad ku duuban, iyo waqti dheeraad ah oo ka badan kan waqtiga maalinta dugsiga si loo dhammaystiro imtixaanka.

Shuruudaha CAHSEE waxay bar tilmaameedsanayaan qaabbilaadda xaddaysan iyo qaabbilaadda gaar ahaaneed kuna aaddan ardayda naafada ah waana in loo oggolaado isticmaalka haddii ay ku caddahay barnaamijka waxabarasho ee gaar ahaaneed (IEP) ama Qaybta Qorshaha 504 oo loo isticmaalayo CAHSEE, ee habka u dejisan imtixaamaadka, ama u isticmaalka macluumaadka fasalka iyo qiimaynta.

Ardayda isticmaasha qaabbilaadda xaddaysan kuna guulaysta derejo dhan 350 dhibcood ama ka badanba waa ay ku najaxeen qaybtaa iyada ah ee CAHSEE-ga.

Qaabka Hawl Fududeynta Loogu Talagaly Ardayda Naafada ah

Habka hawl fududeynta meesha imtixaanka lagu qaadayo waxbaa laga beddeli karaa taas oo aan saameyn ku yeellan doonin qiyaasidda ama isu eegidda buundooyinka imtixaanka ee CAHSEE-ga. Tusaalooyinka hawl fududeynta loogu talagalay CAHSEE-ga waxaa ka mid ah kalkuleytarka loo isticmaalo imtixaanka qaybta xisaabta, iyo qaybta akhriska ee farshaxanka Luqada-ingiriisida oo ardayga loo akhriyo ama la dhegysiiyo cajalad hadal ku duuban yahay, ama si caaddi ah loo isticmaalo Higgaadinta Luuqada Ingiriisida ama ardayga su'aalaha imtixaanka loogu soo bandhigo Luuqada Fara-ka Hadalka ee Maraykanka.

Shuruucaha CAHSEE waxay bar tilmaameedsanayaan hawl fududeyn gaar ahaaneed kuna aaddan ardayda naafada ah waana in loo oggolaado isticmaalka haddii ay ku caddahay barnaamijka waxabarasho ee gaar ahaaneed (IEP) ama Qaybta Qorshaha 504 oo loo isticmaalayo CAHSEE, ee habka u dejisan imtixaamaadka, ama u isticmaalka macluumaadka fasalka iyo qiimaynta.

Ardayda isticmaasha qaabbiladda gaar ahaaneed helana derejo u dhiganta ama dhibco tiradaa u dhiganta hal qayb ama ka badan ee CAHSEE-ga ma ay gudbin imtixaanka laakiin waa laga yaabaa in laga ka reebo shuruudaha CAHSEE-ga oo ay ka heli karaan gudiga dugsiyada degaanka. Waalidiinta iyo ilaaliyada kale waa inay weydiiyaan maammulaha dugsiga ayaa ka dhiibi kara ka dhaafidda imtixaanka ardaygooda.

Warbixinta intaa ka badan ee qaababka imtixaanka ee kala duwan, waafajinta, hawl fududeynta habka geedi-socdaka, iyo codsiga ka dhaafidda waxaa laga heli karaa bogga intarnetka ee CDE (Waaxda Waxbarashada California) oo ciwaankeedu yahay http://www.cde.ca.gov/ta/tg/hs/accmod.asp ama la xiriir dugsiga sare ee magaaladaadda ama degmada dugsiyada.